

Isbaddeladan sharciga ah ee la soo jeediyay waxaa loo gudbin doonaa xubnaha bulshada inta lagu jiro doorashooyinka sanadlaha ah ee Diseembar 16, 2020.

Doodda: Ka saara, Subsection D (Qayb hoosaadka D), Qaybta 14, Qodobka V oo u qoran sidan soo socota:

QODOBKA V

GUDDIGA AGAASIMAYAASHA (BOARD OF DIRECTORS)

Qaybta 14: Khilaafka Danaha.

D. Hay'ad is-dulsaaran Hay'ad is-dulsaaran waa Hay'ad ujeedadeedu tahay (a) in ay noqoto ka qaybgalinta muwaadin ama urur matala xaafadda dhexdeeda ama (b) matala urur dano gaar ah ka leh Xaafadda. ii. Aan ahayn Madaxweynaha Shirkadda, aan ahayn in ka badan laba Agaasime, iyo qofna aan loo magacaabin Guddoomiyaha Guddiga Joogtada ah, ayaa sidoo kale (1) wuxuu noqon karaa Hay'ad gaar ah oo is-dulsaaran (2) ama ahaan kara xubin ka mid ah isla qoyska soke (xaaska, wiil, gabar, waalid, walaal ama walaasha), ama xiriir la mid ah ama u dhigma la leh urur gaar ah oo is-dulsaaran. Agaasimaha Fulinta (Executive Director) iyo guddoomiyeyaasha Guddiyada Joogtada ah ee ay doorteen guddiyadaasi laguma xirayo xaddidaadan.

Doodda: Ka saara Qaybta 5, Qodobka IV ee xeerka oo ku beddela luqadda la soo jeediyey ee hoose.

QODOBKA IV

KULANKA SANNADKA HAY'ADA

Ka saara

Qaybta 5: Kulamada Gaarka ah ee Xubnaha. Xubnuhu waxay u baahan karaan Kulan Gaar ah ee Xubnaha iyagoo Guddiga u soo gudbinaya codsi ay saxiixeen konton (50) xubnood ama kabadan. Markii uu helo codsiga, Guddigu wuxuu jadwal u samaynayaa kulan, iyadoo doorbidayo in lala tashado codsabayaasha, inuu qabsoomo ugu yaraan labaatan (20) maalmood gudahood laakiin aan ka dambayn afartanka (maalmood) ee soo socda, Guddigu waa inuu xubnaha siiyo ugu yaraan afar iyo toban (14) maalmood ka hor ogeysiiska dadweynaha ee Shirka Gaarka ah ee xubnaha.

Ku beddela

Qaybta 5: Kulamada Gaarka ah ee Xubnaha. Xubnuhu waxay u baahan karaan Kulan Gaar ah ee Xubnaha iyagoo Guddiga u soo gudbinaya codsi ay saxiixeen konton (50) xubnood ama kabadan oo ka socda mid kasta oo ka mid ah shanta degaan degmo, oo lagu daray 50 xubnood oo ka socda deegaanka ganacsiga iyo 50 ka socda deegaanka ardayda. Markii uu helo codsiga, Guddigu wuxuu jadwal u samaynayaa kulan, iyadoo doorbidayo in lala tashado codsabayaasha, inuu qabsoomo ugu yaraan labaatan (20) maalmood gudahood laakiin aan ka dambayn afartanka (maalmood) ee

soo socda, Guddigu waa inuu xubnaha siiyo ugu yaraan afar iyo toban (14) maalmood ka hor ogeysiiska dadweynaha ee Shirka Gaarka ah ee xubnaha.